IMDi
Integrerings- og mangfoldsdirektoratet

Macluumaad ku saabsan qofka diiwaangelinaya aqoontiisa

Waa macluumaad ku saabsan qofka degan kaamka la-qabsiga (integreringsmottak) ee diiwaangelin doona macluumaadka aqoontiisa.

Wax ka ogaanshaha aqoonta qofka waa qeyb qasab ah ka mid ah barmaamijka dhammaystiran, iyo qeyb ka mid ah heshiishka degenaanshaha kaamka la-qabsiga. Waa inaad diiwaangeliso aqoontaada si laguu siiyo talada ugu fiican ee ku saabsan waxbarashada iyo shaqada Norway, iyo si ay suurtogal u noqoto in lagu siiyo barmaamij dhammaystiran oo kugu habboon. Diiwaangelin la'aantu saameyn ayay kugu yeelan kartaa iyo buuxinta heshiiska barmaamijka dhammaystiran. Diiwaangelin la'aantu waxay kale oo saameyn ku yeelan kartaa dadaalka IMDi ee ah inay kuu hesho degmo ku dejisa oo kugu habboon.

Waa maxey sababta aad u diiwaangelineyso aqoontaada?

Waxa Norway jira dhawr xafiisyo dowladeed oo dadka kala taliya tababarka, waxbarashada iyo shaqada. Waxey u baahan yihiin macluumaad ku saabsan aqoontaada si ay kuugu jiheeyaan sida ugu wanaagsan ee ugu macquulsan.

Haddii lagu siiyo oggolaansho deganaansho oo kaalmo dawladeed lagugu dejinayo, macluumaadka ku saabsan aqoontaada ayaa ka mid ah dhawr arrimood oo ay IMDi tixgeliso markay kuu dooranayso degmo ku dejisa oo kugu habboon.

Macluumaadyada ku saabsan aqoontaada ayaa marka dambe loo isticmaali doonaa si laguu siiyo hagitaan xirfadeed, waxa aad higsaneyso iyo waxyaabaha uu ka kooban yahey barnaamijkaaga hordhaca ah, oo kugu habboon.

Sababta ka-baaraandeggida

Waxaad saxeexday heshiis ku saabsan ka qeybqaadashada barmaamijka dhammaystiran ee kaamka la-qabsiga. Si loo fuliyo ujeedada heshiiskan, waxaa lagama maarmaan ah in la diiwaangeliyo macluumaadka aqoontaada. Fulinta heshiiskan ayaa aasaas sharci u ah ka baaraandegida macluumaadka adiga kugu saabsan. Sida ku cad nidaamka ilaalinta xogta shakhisaga qodobka 6aad, lambarka 1aad, xarafka b waa la oggol yahey in la eego xogta shakhsiga ah markii loo baahdo si loo fuliyo heshiis lala galey qofka diiwaangashan.

Macluumaad ku saabsan baaxadda diiwaangelinta

Markaad diiwaangelineyso aqoontaada, lama ururinayo macluumaadyo ka badan kuwa laga ururiyo dadka la siiyay oggolaansho deganaansho oo markaa *xaq* u leh oo uu *waajib* ku yahay inay diiwaangeliyaan aqoontooda.

Qofka kula talinaya inta aad diiwaangelinta ku guda jirto wuxuu ku qori karaa faahfaahin meesha qoraalka lagu qori karo si loogu kabo macluumaadka aad ka diiwaangeliso Kompass. Waxa uu la-taliyuhu meesha qoraalka lagu qori karo ku dari karaa macluumaad dheeraad ah oo *keliya* qodobada ku jira Kompass.

Waa kuwee macluumaadyada kugu saabsan ee laga diiwaan gelinayo Kompass:

- Dhalasho, jinsi iyo da'da
- Luqadaha aad taqaano
- Waxdhigasho/waxbarasho

IMDi
Integrerings- og
mangfoldsdirektoratet

- Khibrad shaqo
- Hawlaha aad qaban jirtay ee khuseeya waxbarasho iyo shaqo
- Waxyaalaha aad xiisayso
- Rabitaankaaga waxbarasho iyo shaqo

Yaa ogaan kara macluumaadyada aad diiwaangelisay?

Agaasinka isdhexgalka- iyo kala-duwanaanta (IMDi) ayaa masuul ka ah macluumaadyadaada ku saabsan aqoontaada. IMDi waxey kale oo kaydisay magacaaga iyo DUF-lambarkaaga si aannu u garan karo macluumaadyadaada.

Rugaha hammiga shaqooyinka ee hoos taga gobolka ayaa bixin doona hagitaan ku saabsan hammiga shaqo taas oo ku saleysan macluumaadka aqoontaada. Haddii lagu siiyo oggolaansho deganaansho oo aad ka mid tahey dadka la siinayo barnaamijka hordhaca, waxaad xaq u leedahey oo waajib kaa saaran yahey inaad ka qeybqaadato hagitaanka hammiga shaqo. La taliyeha hammiga shaqo wuxuu macluumaadkaaga u adeegsan doonaa si uu kuu siiyo tallooyinka ugu macquulsan ee wabarasho iyo shaqo ee Norway. La taliyeha hammiga shaqo wuxuu maxsuulka ka soo baxa talobixinta la wadaagi doonaa degmada, IMDi iyo NAV.

Hay'adda shaqada iyo daryeelka (NAV) waxey macluumaadyada kugu saabsan u adeegsan kartaa si ay kuu siiso talobixin ku saabsan fursadaha aad Norway shaqo kaga heli karto.

Degmada uu kaamku ku yaallo waxey macluumaadyada kugu saabsan u adeegsan kartaa habaynta barmaamij dhammaystiran ama hawlaha dhiirrigelinta isdhexgalka.

Haddii lagu siiyo oggolaansho deganaansho oo kaalmo dawladeed lagugu dejinayo waxey **degmada lagu dejinayaa** macluumaadyadaada u adeegsan doontaa si laguu siiyo barmaamij hordhac, barashada afnoorwiijiga iyo cilmiga bulshada oo kugu habboon amaba deeqaha kale ee ku saabsan waxbarasho.

Macluumaadyadaada waxa loo adeegsan karaa **cilmibaadhis gaar ah- iyo ujeedo tirakoob.**

Xuquuqo noocee ah ayaad leedahay sida ay dhigayaan xeerarka ilaalinta xogta shakhsiga?

Waxaad xaq u leedahay inaad aragto macluumaadyada adiga kaa diiwaan gashan.[1] Waxaad codsan kartaa in macluumaadka khaldan la saxo ama la tirtiro.[2] Waxaad xaq u leedahay inaad codsato in macluumaadyada kugu saabsan aan la adeegsan karin tusaale ahaan haddii aad aaminsan tahey inaaney sax aheyn.[3] Waxaad xaq u leedahay inaad ka dacwooto habka looga baaraandegayo macluumaadka .[4]

Haddii aad rabto inaad adeegsato xuquuqaha la xidhiidha ka baaraandegidda macluumaadkaaga, waxaan kaa codsaneynaa inaad la xidhiidho IMDi cinwaanka iimeylka ee: post@imdi.no, ama si toos ah wakiilka ilaalinta xogta shakhsiga ah ee IMDi iimeylka: personvernombud@imdi.no. Macluumaadka aad bixineyso waxa la keydinayaa muddo ilaa 15 sanno ah.

Si aad u ogaato macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqahaada, waxaan kugula talineynaa bogga internetka ee Datatilsynet https://www.datatilsynet.no/rettigheter-og-

[1] Jf. personvernforordningen art. 15.
[2] Jf. personvernforordningen art. 15.
[3] Jf. personvernforordningen art. 15.
[4] Jf. personvernforordningen art. 15.

plikter/den-registrertes-rettigheter/, iyo bayaanka caddaynta xogta shakhsiga ee IMDi https://www.imdi.no/om-imdi/personvern/.

Diiwaangelinta:

Waxaan rabaa inaan diiwaangeliyo aqoontayda.

Waan fahmey waxa macluumaadka aan bixinayo loo isticmaali karo ama loo isticmaalayo.

Ma rabo inaan diiwaan geliyo aqoontayda.

Waan fahamsanahey in diiwaangelinta aqoonta ay lagama maarmaan u tahay si la iiga siiyo kaamka la-qabsiga barmaamij dhammaystiran. Waan fahamsanahey in diiwaangelin la'aantu keeni karto in la i siiyo deeq liidata oo ku saabsan waxbarid, waxbarasho iyo talobixin ku saabsan shaqo iyo waxqabadyada ee Norway. Waan fahamsanahey in diiwaangelin la'aanta aqoonta saameyn ku yeelan karto degmada la i dejin doono.